

# Macluumaadka *Candida auris* ee loogu talagalay Degenayaasha iyo Xubnaha Qoyska

*Candida auris* (C. auris) waa nooc ka mid ah fangaska kaas oo u keeni kara xanuun halis ah bukaannada isbitaallada la dhigay. Bukaan-jiifyada lagu qaabiya oona ku jiray muddo dheer daryeelka goobaha caafimaadka, gaar ahaan goobaha daryeel-caafimaadeedka sare oo ay ku jiraan isbitaallada daryeelka ba'an ee muddada-dheer (long-term acute care hospital, LTACH iyo qeybaha ACH-ka ee ay xaaladoodu xalista sare leedahay (tusaale, qeybaha daryeelka degdegga ah (intensive care units, ICU)) ayaa halista ugu sareysay ugu jira *C. auris* iyo gumeysiga noolaha kale ee u adkaysta dawada badan (multidrug-resistant organism, MDRO) iyo caabuqa. Waa kuwan waxaa ku qoran waxa aad u baahan tahay inaad ogaato haddii adiga ama xubin qoyska ka mid ah aad qabto ama uu qabo caabuqa *C. auris.*

## Su'aalaha Inta Badan Laisweeydiiyo

**Waa maxay calaamadaha caabuqa *C. auris?***

- Calaamadaha lagama yaabo in la GARTO, sababtoo ah deganayaasha qaba caabuqa *C. auris* ayaa badanaaba ku xanuunsan isbitaalka oo qaba cudur kale oo halis ah.
- Calaamadaha caabuqa *C. auris* waxay ku xidhan yihiin qaybta jidhka ee uu saameeyey. *C. auris* wuxuu sababi karaa noocyo badan oo caabuq ah, sida caabuqa asiiba qulqulka dhiiga, caabuqa ka dhasha goobta dhaawaca ah, iyo caabuqa dhegta.

**Yeey u badan inuu ku dhaco caabuqa *C. auris*?**

- *C. auris* badanaa waxa uu saameeyaa degenayaasha kuwaas oo horey u qabay dhibaatooyin caafimaad oo badan.
- Badanaaba waxay saamaysaa dadka sida joogtada ah u joogi jiray isbitaalka ama ku nool guryaha dadka waayeelka lagu xanaaneeyo.
- *C. auris* waxa uu aad ugu dhowyahay inuu saameeyo deganayaasha nidaamka difaaca jirkoodu uu daciifiyay xaalado ay ka mid yihiin kansarka dhiigga ama sokorowga, qaata antibiyootik fara badan, ama ay u sugnaatay aaladaha sida tuubooyinka jidhkooda gala (tusaale, tuubooyinka neefsashada, tuubooyinka quudinta, kateetarka ku jira dhiigga xididka, ama kateetarka kaadiheysta).

**Miyaa la daweyn karaa caabuqyada *C. auris*?**

- Inta badan caabuqyada *C. auris* waxaa lagu daaweeyaa heerka daawooyinka fangaska ee loo yaqaan echinocandins.
- Qaar ka mid ah caabuqyada *C. auris* ayaa ahaa kuwo u adkeysta dhammaan saddexda qaybood ee ugu muhiimsan daawooyinka fangas-ka, taas oo ka dhigaysa inay adagtahay in la daweeyo. Xaaladdan oo kale, dawooyin badan oo ah lidka fangaska oo leh qiyaaso/kuuro sarreeya ayaa laga yaabaa in loo baahdo si loo daweeyo caabuqa.

**Deganaha guriga kalkaalinta ee qaba *C. auris* ma ka qaybqaadan karaa waxqabadyada dadka kale, sida cunto meel ku cunida ama kulamada bulshada, haddii ay ku jiraan taxaddarradan gaarka ah?**

Guud ahaan, deganayaasha guryaha dadka waayeelka lagu xanaaneeyo ee ku qaba *C. auris* maqaarkooda ama meelaha kale ee jirka ama la bukooda xanuunka *C. auris* waxay ka bixi karaan qolalkooda si ay uga qayb galaan cunto cunista iyo hawlaha kooxda haddii:

- Waxay si fiican u dhaqi karaan gacmahooda si joogto ah.
- Dhaawacyada waa la faashadeeyaa si looga hortago in wax dareere ah ay soo baxaan oo ay dadka kale qaadsiiyaan.
- Noocyada kale ee dheecaannada sida xaakada ayaa ku jira.
- Shayada ay dadka deggani taabtaan inta badan oo ay la wadaagaan qalabka (tusaale, qalabka daawaynta jireed ama agabka madadaalada) waa in la nadiifiyaa oo la jeermi-tiraa isticmaalka ka dib.

**Muxuu qofka deganaha ah ee qaba cudurka *C. auris* ugu baahan yahay taxadar gaar ah inta lagu jiro daryeelka?**

- *C. auris* waxa uu ka faafi karaa qof degane una faafi karaa qof kale marka la joogo goobaha daryeelka caafimaadka, sida isbitaalada iyo guryaha dadka wayeelada lagu xanaaneeyo, xataa hadii *C. auris* uu ku dhaco maqaarka ama goobaha kale ee jidhka oo aanu deganuhu lahayn astaamo.
- Taxaddar gaar ah ayaa yaraynaysa fursada loogu faafinayo fangaska deganayaasha kale. Taxadaradan waxaa ka mid noqon kara:
    - Ku meeleynta deganaha hal qol.
    - Ka yagleelida xidhashada dhar-kor ka gashiga shaqaalaha daryeelka caafimaadka ama daryeelayaasha kale iyo galoofyada inta lagu jiro daryeelka deganaha.
    - Ku nadiifinta qolka alaabta nadiifinta ee kala duwan.
    - In xubnaha qoyska iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadku ay si fiican u nadiifiyaan gacmahooda ka dib marka ay booqdaan deganayaasha. Deganaha waxa kale oo lagu dhiirigelin karaa inay gacmahooda dhaqdaan marar badan.

**Xubnaha qoysku ma xanuunsan karaan?**

- Xubnaha qoyska ee caafimaad qaba waxay u badan tahay inay leeyihiin fursad hoose ee soo gaadhista caabuqa *C. auris.*
- *C. auris* waa inta badan waxa uu khatar ku yahay dadka horayba ugu sii jiranaa dhibaatooyin caafimaad oo badan oo waqti badan ku qaatay goobaha daryeelka caafimaadka.
- Xubnaha qoyska iyo kuwa kale ee daryeelaya deganayaasha qaba *C. auris* waa inay si fiican u dhaqdaan gacmahooda ka hor iyo ka dib taabashada qofka deganaha ah ama taaban qalabka caafimaadka.
- Gacmo-dhaqashada ayaa si gaar ah muhiim u ah haddii daryeelaha uu guriga ku daryeelayo in ka badan hal qof oo xanuunsan.
- Xaaladaha intooda badan, xubnaha qoyska iyo dadka kale ee xidhiidhka u dhow la leh deganayaasha qaba caabuqa *C. auris* laguma talinayo in laga baaro *C. auris.*

NORTH Dakota | Health & Human Services
Be Legendary.